



# Kooxda taageerada dadka wax tarka kheryraadka kale

leh waxay kaa caawinayaan luqada- iyo  
fahanka dhaqanka




# Hordhac

Mararka qaarkood kala duwanaanta luqadda iyo dhaqanka waxey kugu adkeyn kartaa, inaad ka hesho agagaarka adeegyada caafimaad ee Degmada, iyo inaad ogaato sida ay u shaqeeyaan. Kooxda kheyraadka qowmiyadaha, ayaa kaa caawin karta intaad waddada ku jirto.

- Dhibaatooyin ma ku qabtaa, marka aad la xiriirto Degmada?
- Ma jiraa wax, aadan fahmin ama aadan hubin, oo la xiriira adeegyada caafimaad ee Degmada iyo caawimaadda, aad hesho?
- Ma u baahan tahay xiriiriye, si aad ugala hadasho shaqaalaha caafimaadka wax ku saabsan asalka dhaqankaaga ama shey kale oo xaaladahaaga nololeed ah?


Markaa waxaad caawimaad ka heli kartaa qofka kheyraadka ee ka socda kooxda kheyraadka qowmiyadaha, kaasoo yaqaana asalka dhaqankaaga iyo luqaddaada, oo leh waajibaadka inuu sirta qariyo.



Kooxda  
taageerada asalka  
way ku hagayaan

# Muxuu qaban karaa qofka kheyraadka?

Qofka kheyraadka wuxuu kaa caawin karaa la hadalka, marka aad u baahan tahay adeegyada caafimaad ee degmada ama caddeynta la xiriirta deeqaha jira. Haddii aad u baahan tahay talo ama caddeynta su'aal, qofka kheyraadka ayaa sameynaya sida ugu fiican si uu kuu caawiyo. Qofka kheyraadka ayaa diyaar u ah wadahadal qof ahaan iyo taleefon labadaba ee arrimaha la xiriira talo bixin iyo taageero, iyo inuusan nuxurka wadahadalka ugudbinin dad kale.



Qof taageere ah  
ayaa ku caawinaya  
marka aad la  
xidhiidhayso  
kamuunka






## Waa maxay kooxda kheyraadka qowmiyadaha?

Kooxda kheyraadka qowmiyadaha waa deeq loogu tala galay muwaadiniinta asal ahaan qowmiyadaha kale ee laga tiro badan yahay ka soo jeeda. Kooxdu waxay dabooshaa aaga Maamulka Caafimaadka iyo Daryeelka. Dadka kheyraadka ee kooxdaan waxaa lagu xushay iyadoo lagu saleynaayo xirfaddooda luqadeed si ay dadka kale ugula hadlaan luqaddooda.

# Maxaa qasab ah inaad sameyso, haddii aad rabto inaad isticmaasho kooxda kheyraadka qowmiyadaha?

Haddii aad qabto rabitaan ah inaad la hadasho qofka kheyraadka, waa inaad u timaadaa shaqaalaha guriga dadka waayeelada, daryeelka guriga, xarunta dhaqdhaqaaqa, rugta caafimaadka, ama hadba meeshi aad kala xiriiri karto Maamulka Caafimaadka- iyo Daryeelka. Markaas kadib iyaga ayaa la xiriiraya isku-duwaha kooxda kheyraadka qowmiyadaha.



Waxaan kuu helaynaa qof taageere ah, oo kugu haboon



# Kala xiriir

Xusuuso inaad sheegto asalka luqaddaada iyo dhaqankaaga, qaabkaas ayaan si fudud kuugu xuli karnaa qofka kheyraadka ee ku haboon.

Haddii aad qabto su'aalo, markaas kala xiriir isku-duwaha taleefonka 23 81 74 25 ama e-mailka [etniskressourceteam@kk.dk](mailto:etniskressourceteam@kk.dk)

Peder Lykke Centret  
Peder Lykkes Vej 63-65  
2300 København S

Telefon: +45 23 81 74 25  
Email: [etniskressourceteam@kk.dk](mailto:etniskressourceteam@kk.dk)  
Web: [www.pederlykkecentret.dk](http://www.pederlykkecentret.dk)